WIXII KA DAMBEEYA JIDKA HAREERTIISA

Macluumaadka Dib u warshadeynta Metro wax bixisaa taageero la xiriirta waxyaalaha aan lagu dhaafi karin jidka hareertiisa. Waxay sidoo kale hayaan macluumaadka bacriminta guriga gadaashiisa.

WAXYAALAHA DIB LOO WARSHADEYN KARO EE AAN LA DHIGI KARIN JIDKA HAREERTIISA — Waxyaalo badan, oo ay ka mid yihiin elektaroonikada, alaabta yar yar ee la isticmaalo, Styrofoam™, bacaha, waxyaalaha la raaciyo baakadaha wax lagu rido iyo qaar ka mid ah caaga adag ee balaastikada ah dib ayaa loogu warshadayn karaa goobaha lagu warshadeeyo ama ganacsiyada kale.

HARAAGA KHATARTA AH IYO ELEKTAROONIGA — Kimikada sunta ah, nalalka cad ee dhaadheer (CFLs), kambiyuutarada, shaashadaha, telefishanada waa in loo qaadaa xarumaha sida fiican u maamula. Waxyaalahani qayb kama aha barnaamijka qashinka looga qaadayo jidka hareertiisa.

BACRIMINTA GURIGA GADAASHIISA — Haraaga barxadda iyo haraaga khudrada waxaa lagu bacrimin karaa gurigaaga gadaashiisa ama waxaa lagu ridi karaa caagaaga la riixo ee qashinka ee cagaarka ah. Cuntada nooca sida hilibka, badarka, caanaha iyo lafuhu waa in ay aadaan caaga la riixo ee qashinka.

Internet-ka: www.oregonmetro.gov/recycling
Khadka Tooska ah: 503-234-3000
Email-ka: mri@oregonmetro.gov

Metro | *Making a great place*

Lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyay

IS XASUUSINTA MAALINTA QASHIN URRURINTA

- Bilow in aad toddobaad kasta aado caaga la riixo ee qashinka ee cagaarka ah — haddii aanu buuxin.
- Bilow in aad aado caaga la riixo ee qashinka dib loo warshadeeyo ee buluuga ah iyo caaga jaalaha ah ee dhalooyinka kaliya marka ay buuxaan.
- Caagaga qashinka waxaad 6 subaxnimo dhigtaa 3 feet meel u jirta jidka hareertiisa.
- Caagaga qashinka ee maran jidka hareertiisa kaga qaad 24 saacadood gudahood.
- Waxyaalaha aadka uga weyn in lagu rido caagaaga qashinka (sida alaabta la isticmaalo, alaabta guriga, laamaha waaweyn ama jiridda) waa la qaadi karaa iyadoo la bixinayo lacag dheeraad ah. Toddobaad ka hor wac shirkadda qashinkaaga iyo dib u warshadeynta si aad u ogaato qiimaha oo ku kacayo.
- **Wasakh dheeraad ah?** Waxaad maalinta qashin qaadistaada qorshaysan kartaa weelka qashinka lagu rido ama bac dheeraad ah kharashkoodu yahay $5, ama ka dhigo caaga weyn ee qashinka oo dheeraad ah oo kharashkiisu yahay $5–7 bishii.

FIIRI MIISAANKA

Miisaanka u badan ee la ogol yahay waxaa dejisay Magaalada Portland si ay u xaqiijiso caafimaadka iyo badbaadada darawaliinta baabuurta waaweyn. Darawaliintu ma qaadi karaan caagaga qashinka oo miisaankoodu ka sareeyo inta loo qorsheeyay.

Miisaanka u badan ee la ogol yahay

Caaga Qashinka	Pounds
caaga qashinka oo 20-gallon ah	35
caaga la riixo ee qashinka oo 20-gallon ah*	60
caaga qashinka oo 32-gallon ah	55
caaga la riixo ee qashinka oo 35-gallon ah	85
caaga la riixo ee qashinka oo 60-gallon ah	135
caaga la riixo ee qashinka oo 90-gallon ah	175

RIGHT SIZE YOUR GARBAGE CONTAINER

DOORO CAAGA QASHINKA OO BUUXINAYA BAAHIDA GURIGAAGA



20* GALLON oo ah Caaga La riixo ee Qashinka	35 GALLON oo ah Caaga La riixo Qashinka	60 GALLON oo ah Caaga La riixo ee Qashinka	90 GALLON oo ah Caaga La riixo ee Qashinka
60 POUNDS oo ah Miisaanka la Ogol yahay	60 POUNDS oo ah Miisaanka la Ogol yahay	135 POUNDS oo ah Miisaanka la Ogol yahay	175 POUNDS oo ah Miisaanka la Ogol yahay
QIYAASTII 2 Bacaha Jikada oo Dheer	QIYAASTII 3 Bacaha Jikada oo Dheer	QIYAASTII 4 Bacaha Jikada oo Dheer	QIYAASTII 4 Bacaha Jikada oo Dheer

* Macaamiishu ma heli karaan caaga la riixo ee qashinka oo ah 20-gallon afartii toddobaad ee kasta. Kuwo ka mid ah macaamiisha hela 20-gallon waxay heli doonaan caaga la riixo ee qashinka ee la cusboonaysiiyay oo ah 35-gallon.

CAAGA QASHINKA OO KASTAA QAYB AYUU KA QAATAA

XIRFAD U YEELO CAAGA QASHINKA

TILMAAN KU AADAN QASHINKA, DIB U WARSHADAYTIISA IYO BACRIMINTIISA

Internet-ka: www.portlandoregon.gov/bps/carts
Khadka Tooska ah: 503-823-7202
Email-ka: wasteinfo@portlandoregon.gov

Bureau of Planning and Sustainability
Innovation. Collaboration. Practical Solutions.

City of Portland, Oregon
Charlie Hales, Mayor • Susan Anderson, Director

Qashinka la qaadayo toddobaad dhaaf ama afartii toddobaad ee kasta

HAA

Suxuunta waraaqaha ka samaysan, koobabka bunka lagu cabo, baakadaha wax lagu qaboojiyo, baakadaha cuntada lagu qaato, waxyaalaha wax lagu duubo, waxyaalaha wajiga lagu tirtiro, Styrofoam™, bacaha, caagaga balaastikada ah ee ay ku qoran tahay "compostable," balaastikada adag ee wax lagu daboolo, alwaaxda rinjiga ama wasakhda leh, alwaaxda lakabyada leh, nalalka wareegsan

KUWO AY TAHAY IN BACAHA LAGU RIDO Saxarada xayawaanka rabaayada ah, ciida bisadu ku kaadido/ku saxarooto, xafaayadaha, waxyaalaha haweenku nadaafad ahaan u adeegsadaan, danbaska, haraaga alwaaxda, waxyaalaha la raaciyo baakadaha wax lagu rido, dhalooyinka jajabka ah

KUWA AY TAHAY IN LAGU RIDO KONTEENAR XIRAN Dufanka, saliida, iyo xayrta ee jikada loo isticmaalo

XATAA HADDII WAXYAALAHA KA SAMAYSAN BALAASTIKADU AY TILMAAMAAN "COMPOSTABLE," FADLAN KU DHAAF CAAGA WEYN EE QASHINKA EE CAGAARKA AH.

MAYA Kambiyuutarada, shaashadaha, waxyaalaha khatarta leh ee ka soo hara telefishanada, kimikada, nalalka cad ee dhaadheer (CFLs). La xiriir Macluumaadka Dib u warshadeynta Metro (503-234-3000) si aad u barato habka loo tuuro waxyaalahani iyo waxyaalo kale oo dheeraad ah.

Caaga la riixo ee qashinka ee cagaarka ah, caaga la riixo ee qashinka dib loo warshadeeyo ee buluuga ah iyo caaga jaalaha ah ee dhalooyinka waxaa la qaadaa toddobaad kasta

HAA

HARAAGA CUNTADA Hilibka, digaaga, cuntada badda, lafaha, qolofta ukunta, burcadka, rootiga/canjeerada, baastada, badarka, digirta, miraha, khudrada, miraha bunka, cuntada halawday/quruntay.

Waraaqaha afmariska, waraaqaha lagu tirtirto, koobabka warqada ah ee bunka, warqada caleenta shaahu ku jirto, baakadaha biisadda lagu rido

HARAAGA BARXADDA Cawska haramaha, caleemaha, laamaha, cawska, laamaha yar yar, ubaxa, dhirta guryaha ka baxda, dhirta la jaro

MAYA Bacaha, Saxarada xayawaanka rabaayada ah, ciida bisadu ku kaadido/ku saxarooto, xafaayadaha, suxuunta waraaqaha ka samaysan, caagaga ah "compostable', dareerayaasha tirada badan, xayrta ama saliidda, alwaaxda, dhagaxaanta, wasakhda, danbaska, laamaha waaweyn (ee balarkoodu ka weyn yahay 4" dhererkooduna yahay 36"), qashinka guriga.

HAA

WARAAQDA Jaraa'idka, wargeysyada, diiwaannada, buuga telefanada, baakadaha, waraaqaha haraaga ah, kartoonada (caanaha, cabitaanka, maraqa), waraaqaha la jeex jeexay (waa in ay ku jiraan baakad)

BALAASTIKADA Dhalooyinka dhuuntoodu tahay (6 oz. ama ka weyn tahay), mugeedu yahay (6 oz. ama ka weyn yahay), dhoobada dhirta lagu beero oo ah (4" ama ka weyn), baaldiyaasha oo ah (5 gallon ama ka yar)

BIRTA Jaandiga ah, qasacadaha cuntada ee tin-ka iyo birta ka samaysan, qasacadaha qalalan ee ranjiga, qasacyada naqaska leh, jaandiga wax lagu duubo, biraha jajabka ah (ee ka yar 30" kana hooseeya 30 pound)

DHALOOYINKA CAADIGA AH IYO KUWA FURKA LEH OO KALIYA Isku dar dhamaan midabyada kala duwan, (waa CAADI astaamaha ku qoran) caaga jaalaha ah ee dhalooyinku ama caaga kale ee adag ee balaastikada ah ee ay ku dhegan tahay "glass only"

SALIIDA BAABUURTA Caag u dhow caaga la riixo ee qashinka ama caaga yar ee la qaadi karo. Isticmaal shay aanan ka soo daadan karin, caaga balaastikada ah ee wax lag dhex arki karo oo leh dabool lagu xiro oo ah (1 gallon ama ka yar). Ha ku darin dareerayaasha kale.

MAYA Bacaha, daboolada balaastikada ah, xafaayadaha, baakadaha wax lagu qaboojiyo, koobabka bunka lagu cabo, dhalooyinka suntan cayayaanka ama dhirta, haaamaha gaaska, qashinka guriga.

Nalalka wareegsan, dhalooyinka wax lagu cabo, weelasha ubaxa lagu rido, dhoobada, dhalooyinka jajabka ah, daboolada.